

Shuruudaha heshiiska ganacsiga korontada ee Esklistuna Energi och Miljö oo kooban.

Goormuu heshiisku dhaqan gelayaa?

Heshiiskaaga korontadu wuxuu dhaqan gelayaa marka aad hesho xaqiijinta heshiiska.

Xaq ka noqosho . wuxuu khuseeyaa oo keliya macaamiisha dadweynaha

Marka aad hesho xaqiijinta heshiiska ka dib waxaad xaq u leedahay inaad 14 maalin gudohood uga noqoto adigoo aan sheegin wax sabab ah.

Ilaa inta uu heshiis koronto shaqeynayo isagoon waqti ku xirneyn

Heshiis koronto oo aan waqti ku xirneyn wuxuu shaqeyaa ilaa aad ka baxdo heshiiska korontada ama aad u beddelato heshiis kale oo koronto.

Ilaa inta uu heshiis koronto shaqeynayo isagoo waqti ku xiran

Heshiis koronto oo waqti **ku xiran** wuxuu shaqeyaa ilaa taariikhda ugu dambeysa ee heshiiskaaga ku qoran.

Waqtiga heshiis ka bixidda

Haddii aad ku jirto heshiis koronto oo **aan** waqti ku **xirneyn** oo shaqeynaya ilaa amar dambe waxay qaadaneysaa 14 maalmood inuu joogsado, ka dib marka aad heshiiska ka baxdo.

Haddii aad ku jirto heshiis koronto oo waqti ku xiran waxay waqtiga heshiis ka bixiddu tahay 14 maalmood, ka hor inta aan la gaarin taariikhda ugu dambeysa heshiiska.

Maxaa dhacaya haddii uu dhammaado heshiiskaaga korontada ee waqtiga ku xiran?

Haddii aadan cusbooneysiin ama aadan ka bixin heshiiska 14 maalin ka hor inta uusan waqtiga heshiisku dhammaannin wuxuu markaas si ootomaatik ah isugu beddelayaa Heshiis koronto oo joogto ah. Heshiisyada ah ilaa amar dambe way ka qaalisan yihiin badanaa kuwa kale. Waxaad ka heleysaa xog ku saabsan qiimaheenna boggayaga internetka: **eem.se/teckna-elavtal**

Heshiiska ah ilaa amar dambe wuxuu shaqeynaya ilaa aad nala saxiixato heshiis kale oo koronto, ama ka baxdo heshiiska korontada. Waad beddeli kartaa ama ka bixi kartaa heshiis koronto oo ah ilaa amar dabme goorti oo aad rabto.

Maxaa dhacaya haddii aad waqtigiisa ka hor jebiso heshiiska korontada?

Haddii aad ku jirto heshiis koronto oo ka kooban qiimo koronto oo go'an, aadna doorato inaad joojiso inta aan la gaarin taariikhdi u dhammaanayay, waxaan xaq u leennahay lacag mag u ah lacagti aan ku khasaarnay ka bixidda heshiiska korontada awgeed.

Tani waxay khuseysaa haddii aan wax ka beddelno shuruudaha heshiiskeenna.

Haddii aad ku jirto heshiis koronto oo **aan** waqti ku **xirneyn**, waxaan kuu sheegi doonaa isbeddellada ugu dambeyn laba bilood ka hor inta aysan dhaqan gelin.

Haddii aad ku jirto heshiis koronto oo waqti ku **xiran** waxaa shuruudaha heshiiska la beddelayaa marka uu heshiisku dhammaado ka dib.

Xaq ayaad u leedahay inaad ka baxdo heshiiska korontada marka aan is beddel ku sameyno shuruudaha heshiiska. Markaas waa inaad ka baxdo heshiiska korontada ugu dambayn 14 maalmood ka hor inta uusan isbeddelku dhaqan gelin.

Haddii aad guureyso

Haddii aad guureyso, waa inaad nala soo xiriirtaa inta aadan guurin ka hor. Heshiiskaaga korontadu wuxuu kuu raacayaa cinwaanka cusub haddii aanan annagu wax kale ku dhihin. Waxaan xaq u leennahay inaan ka baxno heshiiska korontada marka aad guurto.

Lacag bixinta iyo faatuuro soo diridda

Waxaan ku soo dirsaneynaa faatuuro bishiiba hal mar. Waxaan had iyo jeer soo dallacannaa lacagta marka ay bishu dhammaato oo aan aragno inta koronto ee aad isticmaashay ka dib.

Dadka shacabkaahi waxay haystaan 20 maalmood si ay u bixiyaan faatuurada, shirkaduhuna waxay haystaan 30 maalmood si ay u bixiyaan faatuurada.